# Kadhaafinta Banaanbaxa Medicaid iyo Mustaqbalka OHP ee Oregon ee 2022-2027

## Waa maxay ka dhaafida Medicaid?

Medicaid waa barnaamij ay leeyihiin dawladda federaalka ah iyo maamulka gobolka. Gobolka waa inuu codsadaa Medicaid ka dhaafitaankeeda markii uu rabo inuu isbedel ku sameeyo habraacyada caadiga ah ee federaalka. Qorshaha Caafimaadka ee Oregon (OHP), ee Barnaamijka Oregon ee Medicaid, wuxuu gaarsiiyaa daryeel caafimaad dadka dakhliga yari soo galo. Gobolka maamulkiisa ayaa codsan kara in la dhaafo xeerarka qaarkood si loo helo dabacsanaan weyn oo ku saabsan kuwa soo socda iyo in ka badan:

- Yaa u qalma Medicaid
- Waa maxay faa'iidooyinka ay helayaan
- Sidee ayaa daryeelka caafimaadka loo gaarsiiyo xubnaha Medicaid

Qorshaha cusbooneysiinta kadhaafida (oo sidoo kale loo yaqaano Muujinta 1115) waa in isbaddal wacan lagu sameeyo barnaamijka Medicaid ee gobolkeena si sidii hore ka wacan si loogu adeego xubnaheena. Siteembar 28, 2022, Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid Services ayaa siiyay Oregon goaano kama dambays ah oo ku saabsan isbaddallo la ogolaaday oo lagu samaynayo Qorshaha Caafimaadka ee Oregon. Isbaddallada badankood waxay bilaaban doonaan 2024, laakiin qaar ayaa bilaaban doona 2023.

## Yoolasha 2022 – 2027 ee Kadhaafida

Horumarinta sinnaanta caafimaadka waa waxa ugu horreeya ee diiradda lagu saarayo kadhaafida Oregon. Waxay raadin doontaa inay ku dhisto taariikhda hal-abuurka Oregon ee daryeelka caafimaadka, oo aan horumar ka samayno yoolalkayada ugu muhiimsan:

- Abuuritaanka nidaam daryeel caafimaad oo sinnaan badan, dhaqan iyo luqad ahaanba jawaab leh
- Xaqiijinta in dadku sii wadan karaan caymiskooda caafimaadka.
- Horumarinta natiijooyinka caafimaadka ayadoo wax laga qabanaayo baahiyaha bulshada ee saameeya caafimaadka.
- Xaqiijinta qarash gareyn caqligal ah oo firfircoon oo loogu tala galay sinnaanta caafimaadka.

## Waa maxay waxa iska baddalaya Kadhaafida 2022 – 2027

### Isdiiwaangalin

Diiwaangalinta carruurta ee OHP ee joogtada ah, laga bilaabo markay dhashaan ilaa lix jirkooda. Tani waxay ka dhigan tahay in carruurtu ay kusii jiri doonaan caymiskooda ilaa ay lix jir gaarayaan ayna sii wadan karaan inay la kulman isla bixiyayaasha daryeelka caafimaad ee hore muddo dheer, taasi oo keenaysa natiijooyin caafimaad oo sidii hore ka wanaagsan.

Laba sano oo xiriir ah ee isdiiwaangalinta OHP ee dadka da'doodu tahay lix jir iyo ka badan xitaa haddii dakhligoodu isbaddalo. Dad badan oo waaya caymiska caafimaadka OHP waxay keliya u qalmaan muddo kooban kadibna dib ayay ugu soo biiraan OHP. Kuwaani waa

natiijooyinka “marna soo baxa marna aanan soo bixin” ee OHP ee qeybta ka ah natiijooyinka intaa ka liita ee caafimaadka.

## Waxa ay tani uga dhigan tahay xubnaha OHP

Xubnaha OHP waxay noqon doonaan qaar muddo sidii hore ka dheer caymiska u hela. Wakhtigan la joogo, xubnuhu waxay u baahan yihiin inay dib isku diiwaangaliyaan sanad kasta, wayna waaynayaan caymiska haddii wax iska baddalaan u qalmitaankooda (sida isbaddalka dakhliga). Ka dhaafidda cusub, xubnuhu u baahan maayaan inay dib isku diiwaangaliyaan sida badan, isbaddalada kumeel gaarka ah ee u qalmida ku yimaaddaana ka dhigi maayo inay waayaan OHP.

## Baahiyaha Bulshada

Adeegyada ayaa la siin doonaa shakhsiyaadka iyo qoysaskooda la harjadaya nolosha ee ay ku adag tahay. Marka dadku ku jiraan xaalad nololeed oo kala-guur ah oo weyn, sida markii mulkiyadii guri ay lahaayeen ay ka lunto, ama hawadu isbadasho oo xumaato sida qaboow daran markuu dhaco, sida badan waxay lumiyaan helitaanka bixiyayaashooda daryeelka caafimaadka taasi oo keenta natiijooyin caafimaad oo xun.

Si ay gacan uga gaysato haysashada caymiskooda, inay xiriirka la sii wadaan bixiyayaashooda daryeelka caafimaadka, oo ay usii caafimaad qabaan, Oregon waxay rabtaa inay siiso taageero bulsheed xubnaha marka ay waajahayaan dhacdooyinka noocan ah ayadoo la adeegsanayo adeegyo loo yaqaano baahiyaha bulshada ee caafimaadka la xiriira.

Ayadoo ay ku xiran tahay qaabka xaaladda kala guurka ah, qeyb ka mid ah baahiyaha bulshada ee caafimaadka la  xiriira ayaa waxaa soo galaya adeegyo la xiriira:

### Guryeynta

Taageerooyinka guriyeynta waxaa ka mid noqon kara mid ama in ka badan oo ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Kaalmada kirada ama guriyaynta ku meel-gaarka ah (tusaale., bixinta lacagta kirada, dhigaalka, kaalmada utility) ilaa 6 bilood
- Wax ka baddelka guriga (tusaale., sagxada, biraha gacanta, hagaajinta deegaanka)
- Adeegyada taageerada ee kireysiga kahor (sida kahortagga guri ka-saarista, codsiga guriyeynta, taageerada guuritaanka, ka-hortagga guri ka saarida)
- Dhaqdhaqaaq guriyeyn la xiriira iyo/ama maareeyaha arrinka

### Kaalmada cuntada

Taageerooyinka nafaqeynta waxaa ka mid noqon kara mid ama in ka badan waxyaabaha soo socda:

- Linkiyada dhigaallada cunnada ku salaysan bulshada (sida taageero codsi oo loogu tala galay SNAP iyo WIC)
- Waxbarashada nafaqada iyo cunno karinta
- Rejeetooyinka khudaarta macaan iyo tan la karsho (ilaa 6 bilood, sidoo kalena loo yaqaano VeggieRX) iyo sanaadiiqda cunnada/cunnada
- Bixinta cunto loogu talagalay caafimaadka

### Ka difaacidda dhacdooyinka cimilada

Taageerooyinka waxaa ka mid noqon kara mid ama in ka badan oo ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Bixinta lacagta aaladaha joogteeyo heerkul caafimaad leh iyo hawo nadiif ah, oo ay ku jiraan qalabka xakameeya hawada, kuleyliyeyaasha, filtarrada hawada iyo matoorada si ay u shaqeeyaan aaladuhu marka korontadu maqan tahay

## Yaa u qalmi kara adeegyada baahiyaha bulshada ee caafimaadka la xiriira

Kooxaha u qalmi kara adeegyadaan ee ka dhaafida loo adeegsanayo ama cafiska qarashka waa kuwa soo socda:

- Dhalinyarada qaba baahiyaha gaarka ah ee daryeelka caafimaadka ee jira 19 – 26 sano
- Dhallinyarada kulugta leh daryeelka carruurta, ayadoo ay kujirto ka bixitaanka daryeel koriimo ayadoo qofku jiro 18 sano
- Dad guri la'aani hayso ama halis ugu jira guri la'aan
- Dadka waayeelka ah ee kujira caymiska caafimaadka ee Medicaid iyo Medicare
- Dad laga soo daayay ilaalo booliis iyo wixii la mid ah
- Dadka halista ugu jira dhacdooyinka cimilada ee aadka u xun isbaddalka cimilada caalamka dartiis

## Waxa ay tani uga dhigan tahay xubnaha OHP

Xubnaha OHP ee wajahaya caqabado nololeed oo gaar ah waxay heli doonaan guriyeyn iyo nafaqeyn si ay usii caafimaad qabaan waqtiyada ay qabaan baahida intii hore ka badan.